

**Amarka L. 19 Rep.**

**Wax ka beddelka Qod. 9 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya.**

## **MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**

### **XOGHAYAHA GUUD**

Marka uu arkay xeerka 4 Nofember 1951, lamba. 1301, ee lagu meelmariya Heshiiska Wasaayadda ee Dalka Soomaaliya ee hoostaga Maamulka Talyaaniga, kaaso si buuxda oo dhamaystiran loo siiyay fulintiisa;

Marka uu arkay qod. 2 Amarka lamba. 47 ee 1950, kaa soo siinaya Xoghayaha Guud awoodaha iyo xilka marka Maamulaha uu maqanyahay;

Marka uu arkay r.d. 20 Juun 1935, lamba. 1638, ee ku saabsan Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaliya;

Marka uu arkay amarka lamba. 7 ee 12 Abril 1950

Marka uu tixgaliyay in ay habboontahay, in la dardargeliyo qeexidda habraacyada ciqaabta oo Guddoomiyasha Gobolladu ay iqtisaaskooda leeyihiin; waxaa wax laga baddalay – qayb ka mida – qod. 9 ee Xeerka Garsoorka hadda Soomaaliya ka shaqeeya, iyadoo la sugayo in la soo saaro xeerar cusub ee la xiriira dhismaha maadaddada garsoorka;

Marka uu dhageystay talada Golaha Dalka.

### **WUXUU AMRAYAA**

#### **Qod. 1**

Qaybta dambe ee qod. 9 Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya waxaa lagu baddalay sida soo socota:

Guddoomiyayaasha Gobollada waxay u wakiilan karaan garsooridda markasta Guddoomiyayaasha degmooyinka wixii ku siman iqtisaskooda.

#### **Qod. 2**

Iqtiyaarka wakiilashada qod sare lagu sheegay looma adeegsan karo dhulka Guddoomiyaasha Gobollada ay ku joogaan ku-simanimu, wixii ku saabsan xilalka garsoorka, sida ku qod. 54 Xeerka Nidaamka Garsoorka.

Muqdisho, 5 Nofember 1952.

Xoghayaha

**Canino**